

Iyadoo lagu Dadaalayo in la sii wado waxbarashada ardayda haddii ay dhacdo in la xidho iskoolka sababo la xidhiidha cimilada hawada, degmada St. Cloud Area waxay sii wadi doontaa inay adeegsato **Maalmo Waxbarasho Dabacsan** oo guriga lagu dhiganayo inta lagu jiro sannad dugsiyeedka 2021-2022 sababaha la xidhiidha xiritaanka maalinta cimiladu xuntahay sida waafaqsan xeerka Minnesota ee Minn. Stat. §120A.414

Waxyaabaha laga Filayo Ardayga

Haddii ay dhacdo maalin dugsiyeed la joojiyay oo u baahan **Maalin Waxbarasho Dabacsan** oo guriga lagu baranayo, qoysaska waxaa lagu wargelin doonaa fariin toos ah ugu yaraan laba saacadood ka hor ah bilowga maalinta-Dugsiyeed ka caadiga ah ee dugsiyada Degmada St. Cloud ay fulinayso Maalinta Waxbarashada Dabacsan ee guriga lagu baranayo.

Waxbarashada Xannaanada (pre-school)

Ardayda dugsiya xannaanada waxay heli doonaan oo dhamaystiri doonaan taxane ah waxqabadyo waxbarasho oo hore loo qoondeeyey kuwaas oo lasiin doono ardayda xidhmo ahaan ay gurigan u qaataan, marka xaaladaha saadaasha cimiladu ay ka dhigayso in iskoolka la xidho.

Ardayda K-5 (ardayda ilaa Fasalka Shanaad)

Ardayda fasalada K-5 waxay ka heli doonaan hawl-qabadkooda Aaladaha ay ardaydu isticmaasho (sida Computer ka iyo Ipad ka) iyagoo u maraya nidaamka maaraynta waxbarashada ee **SeeSaw**. Macalimiinta iyo Shaqaalaha shati ga haysta waxay soo galin doonaan waxqabadyada waxbarashada barnaamijka ka **SeeSaw** 9:00 subaxnimo oo ah Maalinta Waxbarashada Dabacsan ee ardaydu ay guriga ku baranayso.

Ardayda Dugsiyada Sare (dugasiga Dhexe iyo Dugsiya sare)

Ardayda fasalada 6-12 waxay ka heli doonaan hawl-qabadkooda Aaladaha ay ardaydu isticmaasho (sida Computer ka iyo Ipad ka) iyagoo u maraya nidaamka maaraynta waxbarashada ee **Schoolology**. Macalimiinta iyo Shaqaalaha shati ga haysta waxay soo galin doonaan waxqabadyada waxbarashada barnaamijka ka

Schooly 10:00 subaxnimo oo ah Maalinta Waxbarashada Dabacsan ee ardaydu ay guriga ku baranayso.

Xubnaha shaqaalaha shatiga leh waxay diyaar u noqon doonaan inta lagu gudo saacadaaha ardayda si ay uga jawaabaan su'aalaha ardayda oo ay u hagaan iyadoo adeegsanaya qaabka iimaylka iyo Schooly ga. Dhammaan shaqooyinka Maalinta Waxbarashada dabacsan ee guriga la gu baranayo waxay dhammaan doonaan hal usbuuc ka dib Maalinta Waxbarashada dabacsan. Tixgelin usamayn gaar ah ayaa la siinayaa ardayda hesha waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada Luuqadaha ee EL ka. Haddii tixgelin usamayn dheeraad ah loo baahdo, waxaa ka hadli kara Macalimiinta marka ardaygu ku soo laabto Iskoolka.